Manus
LÆR Å LASTE NED APPER

Qoraalkan waxaa lala isticmaalayaa qoraalka sawirrada wata ee PowerPoint ga ee *Baro in aad app la soo degto. Lambarka qodobka iyo lambarka qoraalka sawirka wata ee* PowerPoint ga waa isku mid. Qodobka 1aad wuxuu u dhigmaa qoraalka sawirka wata ee 1aad (bogga 1aad) ee PowerPoint ga. Qodobka 2aad wuxuu u dhigmaa bogga 2aad iwm. Isla qoraalkan ayaa bog walba oo kuwa sawirrada wata ah hoostiisa ku qoran.

Qoraalka ku qoran **khadda dhalaalaysa** waa faallo loogu tala galay qofka koorsada dhigaya. Qoraalka ku qoran FARTA WAAWEYN waa ciwaan. Qoraalka intiisa kale kor ayaa loo akhrin karaa ama qofka koorsada dhigaya ayaa isticmaali kara marka uu dadka wax barayo.

Qoraal

1. **Inta aadan koorsada billaabin dadka koorsada dhiganaya u sharrax hadafka waxbarashadaan laga leeyahay. Waxay taasi u fududayn doontaa in ay wax bartaan oo ay xasuustaan waxyaalaha ugu muhiimsan.**

2. WARBIXIN KOOBAN OO KU SAABSAN TALEEFANNADA IYO KOMBIYUUTARRDA GACANTA EE KALA DUWAN

3. Taleefannada casriga ah iyo kombiyuutarrada gacanta ee Norway laga isticmaalo waxay u badan yihiin saddex nooc.
   Dad badan ayaa leh iPad ama iPhone.

4. Dad badan ayaa iyagana leh taleefan android ah iyo kombiyuutar gacan.

5. Qaar kalena waxay isticmaalaan taleefannada iyo kombiyuutarrada gacanta ee Windows.

   Taleefannada casriga ah waxay inta badan qabtaan shaqooyin ka badan kuwa kombiyuutarrada gacanta. Sidoo kale, taleefannada iyo kombiyuutarrada shirkadaha kala duwan isku mid ma ah, laakiin way isu eg yihiin inta badanna shaqooyin isku mid ah ayay qabtaan.

Koorsadaan waxaan ku baran doonnaa sida app loogula soo dego kombiyuutarka gacanta iyo taleefanka. Sawirrada iyo sharraxaaddu waxay noqon doonaan kuwo ku habboon taleefannada casriga ah iyo kombiyuutarrada gacanta ee loo badan yahay.

6. LA SOO BAX MAGACAAGA ISTICMAALAHA

7. Haddii ay tahay markii koowaad ee isticmaasho dukaanka app-ka, waa in aad gashaa koontada isticmaalaha [brukerkonto] adiga oo isticmaalaya ereyada furaha ah [passord]. Dadka badankoodu way leeyihiin koonto isticmaale. Waxaa inta badan koontadaas la samaystaa marka u horreysa ee la daarayo kombiyuutar gacan ama taleefanka la soo iibsaday. Si aad haddaba u ogaato in aad leedahay koonto noocaan ah iyo in kale waa in aad gashaa qaybta koontaroolka [innstillinger] ee taleefankaaga.

   Sidaan ayay u eg tahay astaanka qaybta koontaroolku.

8. Riix astaanka koontaroolka.

9. Hadda waxaad ku jirtaa qaybta koontaroolka.
   Waxaad shaashadda ku arkaysaa waxyaalo badan oo la kala dooran karo.
   Dadka isticmaala iPad- iyo iPhone waxay dooranayaan meesha ay ku qoran tahay "iTunes iyo Appstore".
   Dadka isticmaala Android waxay dooranayaan meesha ay ku qoran tahay "Koontooyin".
   Dadka isticmaala Windows waxay dooranayaan meesha ay ku qoran tahay "Iimayl ".

10. Dadka isticmaala iPad- iyo iPhone waxay magacooda isticmaalaha ka helayaan meesha ay ku qoran tahay "Apple-ID".

    Dadka isticmaala Android waxay magacooda isticmaalaha ka helayaan meesha ay ku qoran tahay "Google" waxaana inta badan ku garab qoran "g" yar.

Dadka isticmaala Windows waxay magacooda isticmaalaha ka helayaan meesha ay ku qoran tahay "Koontooyin".
Dadka badankooda magaca koontada/ ID-gu waa ciwaan iimayl oo ay yaqaannaan.

Dadka oo dhan ku soo wareeg oo hubi in uu qof walba helay ciiwaankii iimaylka ee uu ku geli lahaa.

Haddii aad u malayso in ay kugu adag tahay in aad kor ka xasuusato magaca isticmaalaha, meel ku qoro si aad hadhow u xasuusato.

11. Dadka aan lahayn koonto ay ku geli karaan, waa in ay hadda mid samystaan. Waxay aad ugu dhow dahay sida marka ciwaan iimayl la samaysanayo oo kale, waana wax aad hal mar uun u baahan tahay in aad samaysato.

    Dadka aan koonto isticmaale lahayn ka caawi in ay samaystaan.

12. GAL DUKAANKAAGA APP-KA AH

13. Marka aad ku soo laabato shaashadda hore ee taleefanka ama kombiyuutarka gacanta ayaa loo baahan yahay in aad hesho dukaankaaga app-ka ah.

    Kor ayaad ku aragtaa calaamadda dukaankaaga app-ka ah.

    Si aad u isticmaasho dukaanka app-ka ah waa in aad internet haysataa.

    Hubi in uu qof walba helay dukaankiisii app-ka ahaa ka hor inta aadan cashirka sii wadin.

14. Fur dukaanka app-ka adiga oo riixaya. Dooro ”gal” dabadeedna raac tilmaamaha kuu soo baxaya.

Qaybta ciwaanka iimaylka ku qor ciwaankaaga iimaylka (isticmaal ciwaankii aan horey ugu aragnay qaybta koontaroolka).

Qaybta ereyga furaha ah ku qor ereyga furaha ah.

Dadka horey u isticmaalay dukaanka app-ka inta badan wayba ku jiraan dukaanka.

Sug ilaa iyo inta dhammaan la wada gelayo

15. RAADI APP

16. Waxaa jira app-ab badan. Qaar badan oo ka mid ah kuwa ugu caansan waxaad arkaysaa isla marka aad furto dukaanka app-ka. Bogga hoos u wad si aad qaar intaas ka badan u aragto. Inta badan qofku waa og yahay app-ka uu raadinayo. Si aad app-ka u hesho waa in aad raadisaa.

    Dadka isticmaala iPad/iPhone ama Windows waa in ay riixaan calaamadda weynaysada si ay u raadiyaan. Markaas waxay shaashadda ku arkayaan qaybta wax raadinta.

    Dadka isticmaala Android waxay qaybta wax lagu raadiyo ku arkayaan meesha shaashadda ugu sarreysa, taas ayayna riixayaan si ay wax u raadiyaan.

17. Waxaa jira qaar badan oo app ah oo lala soo degi karo. App-ku waa boragaraam si fudud kuugu oggolaanaya in aad isticmaasho adeegyada digitaalka ah adiga oo isticmaalaya taleefan casri ah ama kombiyuutarrada gacanta.

    App waxaad ku isticmaali kartaa wararka, madaddaallada, ciyaaraha, adeegyada bangiga, saxaafadda bulshada iyo qaar kale oo badan. Haddii uu jiro app aad taqaanno oo aad doonayso in aad taleefanka ama kombiyuutarka gacanta kula soo degto, waad raadsan kartaa. Haddii kale, waxaad la soo degi kartaa mid kuwaan ka mid ah.

    Dhammaadka koorsadaan waxaad baran doontaa sida app-ka looga saaro taleefanka casriga

ah iyo kombiyuutarka gacanta. Sidaas darteed wixii aad doonto ayaad la soo degi kartaa.

18. LA SOO DEGIDDA APP

19. Marka hore waxaan dooranaynaa app aan doonayno in aan la soo degno. Waxaan tusaale ahaan u soo qaadanayaa Wordfeud – ciyaar u eg Scrabble taas oo dhawr sano ka hor aad loo jeclaa.

20. Marka hore dukaankayga app-ka ayaan Wordfeud ka raadinayaa.

21. Waxaa hadda ii soo baxay liiska app-ab u dhaw wixii aan raadinayay.

    Waxaan arkaa in ay labada natiijo ee ugu sarreeya yihiin kuwa iigu xiisaha badan.

22. Haddii aad hoos u sii eegtid, waxaad arkaysaa in ay jirto Wordfeud BILAASH AH, …

23. Meesha qaar kale ay lacag joogaan. Marka ay sidaas oo kale dhacdo, inta badan sababtu waa in ay midka bilaashka ah la socdaan xayaysiin, meesha aanay xayaysiin la socon midka lacagta ah. Ka hor inta aan app-ka la gadan waxaa wanaagsan in haddii ay suurtaggal tahay in la tijaabiyo midka bilaashka ah.

    Waxaa jira app-ab la helo keliya isaga oo bilaash ah (khasab ma ah in uu xayaysiis la socdo), meesha qaar kalena lala soo degi karo keliya haddii la gato.

    Si aan warbixinta app-ka u akhristo ka hor inta aanan la soo degin, mar ayaan riixayaa.

24. Sidaan ayuu u ekaan karaa bogga warbixinta- iyo la soo degidda app. Way kala duduwan yihiin iyada oo ku xiran dukaanka app-ka iyo kombiyuutarka gacanta ama taleefanka casriga ah ee la isticmaalayo.

    Sawirkani wuxuu tusayaa warbixinta Wordfeud-ka bilaashka ah.

25. Halkan waxaan ku aragnaa sida kiisa lacagta jooga uu eg yahay.

26. Si app-ka loola soo dego waa in la riixaa batoon ku yaalla bogga xaggiisa kore, oo u dhow astaanta app-ka.

    Waxa batoonka ku qoran waxay ku xiran tahay dukaanka app-ka ee la isticmaalayo.

27. App-abka iPad/iPhone waxaa ku yaalla "qaado" ama qiime ayaa ku yaalla app-ka.

28. Haddii aad hal mar taabato "qaado" waxaa soo qormaya "Xarayso".
    Haddii uu app-ku lacag joogo, markaas waxaad taabanaysaa qiimaha, kaddibna waxaa soo baxaya iibso.

29. Mar kale riix si aad app-ka ula soo degto ama u iibsato.

30. Taleefannada Android iyo Windows-ka ah waxaad hal mar riixi kartaa "Xarayso" ama batoonka qiimaha.

    Qaar baa laga codsan karaa in ay geliyaan macluumaadka kaarka ay wax ku iibsanayaan, markaas waxaad raacaysaa tilmaamaha shaashadda. Caadi ahaan hal mar uun baa waxyaalahaan la sameeyaa.

    Dukaanka app-ka ayaa kaarka xasuusanaya, kaarkana lacag kama goosan doono adiga oo aan oggolaannin.

31. Qaar baa laga codsan doonaa in ay ereyada furaha ah qoraan si ay app-ka ula soo degaan. Qor ereyada furaha ah kaddibna riix "Xaqiiji" ama "Aqbal".

    Qaar baa laga codsan karaa in ay furaha isticmaalaan si ay app-ka ula soo degaan.

32. Marka uu app-ku soo dego wuxuu ku darsamayaa app-abka kale ee kuugu jira taleefanka ama kombiyuutarka gacanta. App-ka cusub ka dhex baar kuwii hore ee kuu degsanaa.

33. Hadda ayaad riixi kartaa si aad app-ka u furto. Asaga oo la mid ah app-abka kale ee horey taleefanka kuugu jiray.

    Inta aadan cashirka sii wadan hubi in uu qof walba app la soo degay oo uu makiinaddiisa ka dhex helay.

34. TIRTIRIDDA APP-KA

35. Waxaa dhacda in uu qofku mararka qaarkood u baahdo in uu app ka tirtiro taleefankiisa casriga ah ama kombiyuutarkiisa gacanta. Waxaa jira app-ab aan la tirtiri karin maaddaama ay la socdeen kombiyuutarka gacanta ama taleefanka, laakiin app-kii aad soo dejisay oo dhan waad tirtiri kartaa.

    Marka hore waa in aad heshaa app-ka aad doonayso in aad tirtirto.

    Farta saar oo ku hay ugu yaraan hal ilbiriqsi. Isbeddel ayaad hadda shaashadda ku arkaysaa.

36. Dadka isticmaala iPad/iPhone waxay arki doonaan in ay gargariirayaan dhammaanba app-abkii shaashadda u saarnaa iyada oo ay istillaab ka saaran tahay geeska bidixe.

    Dadka isticmaala Android waxay meesha shaashadda ugu sarreysa ku arkayaan tanagga qashinka. Haddii aad app-ka farta ka qaaddo sawirku sidiisii hore ayuu ku noqonayaa.

    Dadka Windows isticmaala waxaa shaashadda ugu soo qormaysa "Iska saar".

37. Si aad app-ka iPad/iPhone uga tirtirtid riix istillaabta.
    Kaddibna waxaad riixi kartaa batoonka "guriga" si ay batoonnadu gargariirka u joojiyaan.

Manus
LÆR Å LASTE NED APPER

38. Dadka isticmaala Andriod farta ayay shaashadda saarayaan kaddibna jiidayaan oo borogaraamka dul geynayaan …

39. …tanagga qashinka oo ….

40. …ku sii deynayaan.

41. Dadka isticmaala Windows waxay riixayaan "Iska saar".

42. Haddii markaad intaan samayso kaddib xaqiiji lagu yiraahdo waxaad riixaysaa "Haa" ama "Iska saar".

    App-kii hadda wuu ka baxay kombiyuutarkaada gacanta ama taleefankaada.

43. DHAMMAAD